Ma la damiyey biyaha, gaaska iyo korontada? Sidee kuwaas dib ugu xiri karaa?

Sarkaalka dabka masuulka ka ah ayaa laga yaabaa in uu gooyo dabka, biyaha iyo gaaska sababa amaanka la xiriira dartood inta dabku socdo.

Haddii aad caynsan tahay, shirkadaada caymiska ayaa qabanqaabin karta in adeegyadaan dib loo xiro. Haddii aadan lahayn, adiga ayaa qabanqaabsanaya adiga oo wacaya qolada gaaska bixisa iyo qofka ka shaqeeya.

Cidda bixisa korontada, biyaha iyo gaaska ayaa u baahan doona inay soo diraan dad aqoon u leh si ay u baaraan una dayactiraan adeegaaga, iyaga ayaana dib u xirista qabanqaabinaya.

Maxay warbaahintu meesha u joogaan?

Badanaa warbaahintu waxay kaga waramaan dabka warbaahintooda. Haddii weriye kuu yimaado si uu kuu waraysto, waxaad go'aan ka gaari kartaa ama inaad diido ama ogolaato. Haddii aad ogolaato in lagu waraysto, horay ayaad ugala sii hadli kartaa su'aallaha ay doonayaan inay ku weydiiyaan si aad u ogaato waxay ku weydiin doonaan. Waxaad kaloo weydiin doontaa sarkaalka dabka inuu ku caawimo ama kuu xawilo tas-hiilaad bixiye.

Haddii aadan ku faraxsanayn qayb ka mid ah waraysiga, u sheeg weriyaha in aadan doonayn inaad sii wado. Haddii aan weli la helin sababta dabka welina baaristu socoto, waxaa kuu fiican in aadan waxba kala hadlin warbaahinta.

Waxaan u baahnahay qof aan la hadlo, yaan la hadli karaa?

Dab guriga galaa waa wax aad u xun kaas oo keeni kara xanuun maskaxeed iyo mid shucuureed, taasi badanaa waa caadi, laakiin waxaad u baahan tahay in adiga iyo qoyskaagu aad ka fekertaan sidaad ula qabsan lahaydeen xaallada. Waa muhiim inaad caawimo weydiisataan lana hadashaan qof sida qof ka tirsan qoyska, saaxiib ama la-taliye.

Wadaadka FESA ayaa kuu qabanqaabin kara kaalmo adiga iyo qoyskaagaba. Sarkaalka dabka ee masuulka ka ah ayaa laga yaabaa inuu ugu yeero Wadaadka (Chaplain) gurigaaga si uu kuu siiyo kaalmo shucuureed kaagana caawimo qorshaha mustaqbilka. Waxaa jira dhowr urur oo leh nambarada aad saacad walba wici karto.

Nambarada ku caawimi kara 24ka saacadood:

FESA Chaplain **(08) 9485 7800**
(Kani waa adeega u yeerista, waxaad u baahan tahay inaad fariin ka tagto)

Crisis Care **(08) 9223 1111**

The Samaritans **(08) 9381 5555**

Lifeline **13 11 14**

Sarkaalkaaga dabka qaabilsani waa _____

Wuxuu ka socdaa _____ Fire Station

maalinta _____ kaltanka

Telefoon nambarkiisu waa _____

Sarkaalkaaga dabka qaabilsan ayaa ku caawimi doona isaga oo saxaya sanduukhyada aad ka hadashay wixii ku saabsan oo aad hadda u baahan tahay inaad la socoto:

Haddii aad caynsan tahay:

- ☐ La xiriir shirkadaada caymiska

Shirkadaada caymiska waxay xil iska saari doontaa:

- ☐ deegaan degdeg ah
- ☐ cunto degdeg ah iyo dhar
- ☐ la xiriirida shirkad si aad u nadiifiso khasaraada
- ☐ helida biyo, gaas, iyo koronto la hubiyo dibna loo xiro

Shirkaadaada caymisku waxay talo kaa siin kartaa:

- ☐ qofka lala hadlayo si uu gurigaaga u amaan geliyo
- ☐ marka qiimeeyaha caymisku iman doono gurigaaga
- ☐ markaad la xiriiri karto si uu wax uga qabto gurigaaga

Haddii aadan caynsanayn ama heshiiskaagu aanu daboolayn, la xiriir:

- ☐ hay'adaha xaalladaha degdegta ah ee deegaanka, cuntada iyo dharka
- ☐ shirkad amaangelisa gurigaaga
- ☐ hay'ada talasiinta iyo kaalmada (taas oo Wadaadka ka socda FESA ka mid yahay)
- ☐ shirkad nadiifisa goobta dhibta
- ☐ koronto yaqaan dayactira korontadana dib u xira
- ☐ tuubista yaqaan dayactirka khasaarada dibna u xira biyaha iyo gaaska
- ☐ shirkad wax ka qabata gurigaaga.

OCTOBER 2010

Afeef
Macluumaadka tusahani ka kooban yahay waxaa u bixiyey si tabaruc ah Hay'ada Adeegyada Xaalladaha Degdegta ah iyo Dabka (FESA) adeeg dadweyne ahaan. Tusahaan waxaa loo diyaariyey si mukhlisnimo ah waxaana laga soo qaatay macluumaad la aamisan yahay inuu sax ahaa waqtiga la daabacay. Si kasta ha ahaatee, ku tashiga iyo saxnimada macluumaadka ma ballan qaadi karto hay'ada FESA waxayna si cad meesha uga saaraysaa fal kasta oo la qabtay ama laga tegay ama aan la samayn iyada oo lagu tashanayo macluumaadka iyo wixii ka yimaada, ama toos ha ahaadeen ama yaanay ahaane, oo ka imanaya ficilka la qabtay ama laga tegay. Qoraalka waxaa looga jeedaa in uu ahaado tuse akhristayaashuna waa inay helaan talo madaxbanaan ayna sameeyaan waxweydiinta loo baahan yahay.

Government of **Western Australia**
Fire & Emergency Services Authority

FESA
Fire & Emergency Services Authority of Western Australia

QAADASHADA WIXII HARAY...

WAXAAD SAMAYN KARTO KA DIB MARKA DAB GURIGAAGA KA DHACO

somali

Government of **Western Australia**
Fire & Emergency Services Authority

FESA
Fire & Emergency Services Authority of Western Australia

Haddii dab khasaare u geysto ama burburiyo gurigaaga waxaa laga yaabaa inaad dareento argagax iyo jaahwareer. Waxay kaloo noqon kartaa wax adag inaad aqbasho wixii dhacay. Taasi waa caadi dareenkanina waa iska tegi doonaa. Si kasta ha ahaatee, waxaa jira waxyaalla aad samayn karto oo kaa caawin karaa inaad ka bogsooto.

Qoraalkaani wuxuu kaa caawimi kara inaad ogaato xalka aad heli karto, sidaad u heli karto dhar aad ku bedelato iyo inaad raadiso meeshaad aadi lahayd haddii aadan joogi karin guriga. Dadka jooga goobta wax ka dhaceen ayaa iyaguna ku caawimi kara.

Ma haysto meel aan aado habeenkii. Maxaa ku dhacaya anniga iyo qoyskayga?

Haddii gurigaagu uu caymis ku jiro, wac shirkadaada caymiska maadama laga yaabo inay bixinayso deegaanka xaalladaha degdegta ah sida waafaqsan heshiiska aad la gashay. Badanaa waxaa jira telefoono la heli karo saacadaha shaqada ka dib. Haddii aadan caysanayn, waxaa laga yaabaa inaad la joogto ehel ama saaxiibo.

Xalalka kale waa inaad la xiriirto Department of Housing, taas oo kaa caawimi karta inaad hesho deegaan degdeg ah iyo dejin muddo dheer ah, ama Hay'ada Bulshada ee Daryeelka Qalalaasaha.

Department of Housing, Homeless Advisory Service:
Iacag la'aan ka wac 1800 065 892
(inta u dhexaysa 8fiidkii iyo 5ta galabtii Isniinta ilaa Jimcaha)

Department for Communities, Crisis Care:
(08) 9223 1111 ama Iacag la'aan ku wac 1800 199 008
(maalin iyo habeen)

Sidee shirkadayda caymisku ugu lug yeelanaysaa?

Haddii aad tahay qofka leh guriga waxaad u baahan tahay inaad u sheegto shirkadaada caymiska sida ugu dhaqsaha badan. Waxay u diri doonaan wakiil si uu u qiyaaso qiimaha khasaarada wuxuuna go'aaminaya cadadka la bixinayo.

Haddii aad tahay degane aad leedahayna caymiska alaabta, waxaad iyagana u sheegaysaa qofka guriga leh ama wakiilka wixii ku saabsan dabka, waxaad kaloo la xiriiraysaa shirkada caymiska.

Maxaa dhacaya haddii aanan caynsanayn?

Waxaad u baahan tahay inaad qabanqaabiso dayactirka gurigaaga laakiin xasuuso inaad ku tashato qoyskaaga iyo saaxiibadaa inay ku caawimaan.

Maxaa ku dhacaya gurigayga, ma la cayminayaa isla habeenimada?

Haddii aad tahay qofka guriga leh adiga ayaa masuul ka ah qabanqaabinta amniga gurigaaga intaad sugayso qiimaynta caymiska. Shirkadaada caymiska ayaa ku siin doonta talo haddii cid wakiil ka ahi joogtana, waxay diyaarin karaan shirkad ka dhigta gurigaaga mid amaana. Haddii aad qabto wax su'aalla, la hadal booliiska jooga agtaada.

Haddii ay jiraan meela laga yaabo in wax gaareen, marka laga tagana wax sii gaaraan, State Emergency Service (SES) ayaa ku dabooli kara tarpaulin waxayna xiri karaan waxyaallaha debecsan. Weydii sarkaalka masuulka ka ah ka ah booliiska si loo abaabulo arrintaan, ama wac SES tel: 132 500.

Wax waliba waxay ku lumen dabka. Sidee ku quudinayaa dharna ugu helayaa qoyskayga?

Haddii aad caysan tahay, ka hubi shirkada caymiskaaga maadama laga yaabo inay kaa caawimi karaan dharka sida waafaqsan caymiska.

Haddii aadan caynsanayn ama caymisku aanu arrintaan shaqa ku lahayn, Department for Child Protection ama Department for Communities Crisis Care, ayaa kaa caawin kara cuntada, lebiska, xaalladaha degdegta ah iyo waxyaallaha kale oo muhiimka ah.

Department for Child Protection:
(08) 9222 2555, wicid la'aana 1800 622 258
(inta u dhexaysa 8subaxii ilaa 5casarkii Isniinta Ilaa Jimcaha)

Department for Communities, Crisis Care:
(08) 9223 1111 ama ku wac lacag la'aan 1800 199 008
(maalinimada ama habeenkii)

Wadaad ka socda FESA ayaa isaguna laga yaabaa inuu awoodo inuu ku caawimo kuguna xiro dadka ku siin kara waxyaallaha ugu muhiimsan oo aad u baahan tahay. Fadlan weydii sarkaalka dab damiska inuu abaabulo arrintaan ama Wadaadka ayaa lagala xiriiri karaa farriin-gudbiyaha (pager) adiga oo wacaya (08) 9485 7800 kana tegaya farriin.

Ma qaadi karaan sheeyada shakhsiyeed?

Haddii gurigaaga qayb ka mid ah aanay guban sarkaalka dabdamiska ama Sarkaalka Baarista Dabka ayaa kuu sheegi doona inay amaan tahay inaad gasho, waxaa laga yaabaa inaad hesho alaabta soo socota:

- aqoonsi
- kaarka deynta
- buugaagta jeegaga
- dukumintiyada sharciga ah
- macluumaadka caymiska
- daawooyinka
- galaasyada indhaha
- gargaarayaasha maqalka shakhsiyeed
- dahabka, albamka sawirada, DVD-yada
- waxyaallaha kale oo qiimaha leh.

Si kasta ha ahaatee, waxaa fiican inaad ka hubiso caymiskaaga inta aadan waxba ka saarin.

Dabku wuxuu keenay burbur iyo qashin. Goorma ayaa nadiifin karaa?

Dab damiyayaashu badanaa waxay isticmaalaan biyo xoog ku socda si ay u damiyaan dabka. Waxay sameeyaan da'daal kasta oo lagu xadadi karo khasaarada laguna xafido karo alaabta iyo saabaanka (furniture) si aad degdeg ugu noqoto gurigaaga.

Haddii dabku wax yeellay gurigaaga dhexdiisa, nadiifinta qaarkeed ayaa dabcan loo baahan yahay. Ka hubi sarkaalka dabka ee masuulka ka ah, Sarkaalka Baarista Dabka waqtiga nadiifintu bilaaban karto. Haddii ay jirto baaritaan ama qiimayn halkaas ka jirta dabcan meelaha qaarkood kama bilaabi karto nadiifinta. Waxaa kaloo looga baahan yahay caymiskaaga inaad aragto haddii heshiiskaagu kuu ogolaado nadiifiyayaasha ganacsiga.

Waa maxay doorka Sarkaalka Baarista Dabka?

Marka sarkaalka qaabilsan dabku garan waayo sababta dabka keentay wuxuu u yeeraa Sarkaalka Baarista Dabka. Haddii qof dabka wax ku noqday ama ku dhintay dabka booliiska ayaa iyaguna iman doona.

Waa masuuliyada Sarkaalka Baarista Dabka in uu xaqiijiyo in gurigaagu amaan yahay inta baaristu socoto. Waxay u samayn doonaan xaydaan guriga si aan dad u gelin maadaama laga yaabo in aanu amaan ahayn waxna u dhimi karto baarista.

Haddii aad u baahan tahay inaad gurigaaga gasho xaalladaan lagu jiro waxaa laga yaabaa in booliis ama Sarkaalka Baarista Dabka ku raaco. Marka baaristu dhamaato waxay dib ugu soo celinayaan guriga gacantaada.

Waa maxay doorka Kooxda Gubista ee Booliiska?

Kooxda Gubista Booliiska ayaa iman doonta hadduu codsado Sarkaalka Baarista Dabka. Waxay joogto ula shaqeeyaan adeegyada dadbka waxayna baari doonaan dabka haddii dabka loo arko wax laga shakisan yahay ama ula kac ah, aan go'aan laga gaari karin ama qof dhinto.